
Iftiimi noloshaada

Iftiimi noloshaada

Qalbigii kheyr bartaa qeyb dunida ka qaata



Qoraaga buuga name:hassan noor adam Day:

i *sunday Taariikhda Date: 12/march/2023*

Anack name: {Dhaqtarka___Qalbiga}

1 *wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504*

Iftiimi noloshaada

•Tusmada buuga

1:Mahadnoq.....4

2:Hibeyn.....5

3:Afeef.....5

4:Hordhac.....8

5:Sideen ku iftiimiya nolosheyda.....10

6:Akhlaaqda wanaagsan.....12

7:Dabeecada.....15

8:Xishoodka.....17

9:samirka iyo dulqaadka.....20

10:Ixtiraamka.....23

11:Ku dhaqan cadaalad.....27

12:Quruxda dhabta ah.....29

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

13:Qiimaha qalbiga uu leeyahay.....32

14:Nolosha wanaagsan.....36

15:Guusha dhabta ah.....38

16:Sameyso saaxiib wanaagsan.....41

17:Kalsoonida nafta.....45

18:Maareynta wakhtigaaga.....48

19:dhoola cadeeynta.....54

20:Aamusnaanta.....57

21:Sare uqaad iimaankaaga.....61

22:Dhamaad.....64

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Mahadnoq

Waxaa mahad dhamaanteed iska leh allaah (sw) ee aanay jirin cid la barbar dhigo ama lamid ah, naxriistiisa,raxmadiisa,iyo nimcooyiniisa, ee ku arsaaqey adoomadiisa arsaaq waasac ah,ee iisuurto galiyey inaan diyaariyo oo aan isku dayo dhiganahaan.

Waxaan marlabaad umahadcelinayaa waalidiinteyda oo igu soo dadaaleen dhinaca koriska iyo dhiiri gilintaba, iyo qof walba oo ka qeyb qaatey diyaarinta buugaan.

Waxaa kale oo aan umahadcelinayaa waalidiinteyda labaad oo ah maclimiinteyda oo iyagana igu soo dadaaley dhinaca waxbarashada iyo dhiiri gilinta, waxaa igusii dhiiri galiyey inaan soo saaro buugaan macalin **axmed c/naasir (allaah ha barakeeyo cid walba oo ka qeyb qaadatey inaan soo saaro dhiganaha kan iyo cid walboo akhrida....aamiin.**

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Hibeyn

waxaan uhibeynayaa waalidkeygii ikoriyey ee i kaalin galiyey, kuna howlanaa kobcinta garaadkeyga,

jirkeyga, aqoonteyda, waxaan si gaar ugu hibenayaa

Hooyadeyda macaan ee **muno cumar xuseen** iyo aabaheyga **Nuur aadan cali,** iyo qofkasta oo muslim ah oo jecel inuu liibaano aduun iyo aakhiraba oo iftiimiyo noloshiisa, qoyskiisa, dadkiisa, diintiisa, iyo dalkiisaba.

Afeef

Anigu waxaan ahay bini aadam bini aadamkuna wuu

qaldoomi karaa, hadii aad buugaan wax qaldan ku aragto isku day in aad niyadaada ku saxato waayo qof walboo bini aadam ah aqoonta qeyb ayuu ka heeyaa.

Akhriste waxaa laga yaabaa in aad soo aragtey buugaag badan oo kahadlaya dhiiri gilin, talo iyo tusaaleba,

balse buugaan wax badan ayuu kaga duwan yahay

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

buugaagtaas, waayo buugaan waxaa uu kugu anfici

doonaa inaad ku liibaanto aduun iyo aakhiroba, mida kale waa in aad isweydiisaa buug walbo oo aad akhriso muxuu faa ido uu kuu lee yahay?Waa muhiim su aashaas hadaad ogtahayna wax badan ayaad ka dhaxli kartaa buuga, hadaad rabto inaad wax ka dhaxasho raac tilmaamahaan soo socda.

1:ka fogoow meelaha dadka joogaan ama meelaha buuqa ah oo tag ama aad meel jawigeeda degan yahay oo aan dad joogin.

2:waxkasta aad qabaneysid waa in aad niyadaada galisaa in ay ku dhaxal siin doonaan wanaag badan iyo kheyr.


3:waa in aad iska dhaadhicisaa waxa aad akhrineysid amaba talada lagu siiyey in ay tahay midii aad noloshaada ku bedeli lahayd kuna gaari lahayd hormar iyo wanaag.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Tixraac

Xasan nuur aadan Soosaaraha buuga.



Wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa

Tell:0684492190/wats app/telegram/massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur /http/www.@Email@.

Tell:0613212504.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Hordhac

Waxaa mahad ballaaran iska leh allaah (SW) iyo nabigeena mohamad (n.n.k.h) oo noogu naseexeeyey diinteyna islaamka.

(**caawa ay tahay haween isniin ah oo ay taariikhdu ku beegan tahay 13/3/2023 mida hijriyadana ay tahay 21/8/1444 ayaan bilaabey oo allaah (sw) ii suurto galiyey inaan dhigo dhiganahaan)**

buugaan waa buug door weyn ka qaadan doono nolosha bini aadamka iyo dhamaan muslimiinta jecel in ay guul gaaraan oo ay liibaanaan aduun iyo

Aakhiraba.

Sheeko gogol dhig ah

Lajecloow walaalkaaga waxa aad jeceshahay

Sheekadaan waxaa ay aad utaaban doontaa iimaankaaga iyo sida aad ku iftiimin lahayd noloshaada.

Waxaa jirey wiil uu dhigan jiray school isaga iyo asxaabtiisa waxa ayna ahaayeen isku fasal,

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa macalinka ardayda oo dhan wuxuu amray in uu qof walbo kusoo qoro magaciisa waraaq markii ay ardaydii

sameeyeen arintii ayaa macalinka inuu waraaqaha

uruuriyey ku xirey qol, markaas ayuu arday walba amray in uu waraaqda magaciisa ku qoran tahay soo bixiyo markaas ayaa ardaydii oo dhan wada yaacdey oo mid walba bilaabey in uu magaciisa raadiyo balse uma suurto galin saacad ka dib markii ay daaleen ayaa macalinka ku yiri"qof walba hadii uu helo waraaq hasiiyo qofka iska leh markii ay sameeyeen arintii ayaa usuurto gashey in dhamaantood ay

helaan qof walba waraaqdiisa,

Ardaydaan hada qof waliba wuxuu rawey inuu isaga ku hormaro waraaqdiisa balse uma suurto galin laakiin markii ay bilaabeen in uu qof walba siiyo waraaqda qofka iska leh ayaa usuurto gashay in ay dhamaantood helaan qof walba waraaqdiis,

sheekadaan waxaa aan ka ogaaney in ay farxadaada

ku xiran tahay farxada walaalkaaga amaba qofka

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

kale. waxaa xadiith laga wariyey rasuulkeena (scw)

عن انس ابن مالك رضي الله عنه قال رسول الله صلي الله عليه وسلم لا يؤمن احدكم حتي يحب لا خيه ما يحب لنفسه رواه البخارى ومسلم

(Anis ibnu maalik (RC) wuxuu rasuulkeena (scw) uu ka wariyey: axadkiina kaamil noqon maayo iimaankiisa

ilaa uu wuxuu naftiisa la jecel yahay walaalkiisa lajeclaado.(bukhaari iyo muslim ayaa laga wariyey)

Sunada rasuulka (scw) raac oo walaalkaaga la jecloow waxa aad nafsadaada la jeceshahay.

Sideen ku iftiimiyaa nolosheyda

Noloshaada waxaad ku iftiimin kartaa ku xirnaashaha illaahey (sw)

Waayo hadii aad rabigaaga ku xiran tahay aadna adkeysid xiriirkiisa, oo aad qaadato wixii illaahey (sw)

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

iyo rasuulkiisa ku fareen, kana joogtid wixii illaahey (sw) iyo rasuulkiisu kaa celiyeen, hubaal wey iftiimeysaa Noloshaada,

Hadii aad ku dhaqanto aad joogteyso qodobadaan hoos ku xusan hubaal wey iftiimeysaa noloshaada

qodobada waxay yihiin kuwaan soo socda:

1:U isticmaal codkaaga naxriis.

2:dhegahaaga wax qeyr leh inay maqlaan.

3:maskaxdaada run.

4:Qalbigaaga jeceyl.

5:gacmahaaga sadaqo.

6:jirkaaga oo dhan cibaadada alle.

7:haka daalin xuska rabigaaga.

8:hadalkaagu hayaraado xikmadaada habadnaato.

9:qosolkaagu hayaraado qushuucaagu habadnaado.

10:isku diyaari lakulanka rabigaaga.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Hadii aad qodobadaan sameysid hubaal wey iftiimeysaa noloshaada.

Akhlaaqda wanaagsan

Waa maxay dhaqanka wanaagsan ee islaamku na faraayo?

Wanaajinta dhaqanka iyo akhlaaqda wanaagsan waa ujeedada koowaad ee uu sidey nabigeena mohamad (N.N.K.H),wuxuu yiri"(waxaa la iisoo direy si aan udhameystiro akhlaaqda wanaagsan) dhaqanka wanaagsan waxaa uu ku xiran yahay iimaanka qofka,

hadii ahklaaqdaadu xumaato iimaankaaguna wuu daciifayaa. taasina waxa inoo cadeeyey xadiithka rasuulka (scw) ee ku yiri"(allaah ayaan ku dhaartee imuu rumayn, illaahay baan ku dhaartee imuu rumeyn, markaas baa la yiri waa kuma kaas rasuulka allaw,(saxaabada baa weydiiyeen)markaasuu ku yiri"waa kan dhibaatadiisa ka nabad galin jaarkiisa,

(Waana dhaqan xumo jaarka (dariska) loo geeysto).

Mida kale ma ahan in aad jaarkaaga oo keliya kula dhaqanto akhlaaq wanaagsan ee kula dhaqan

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

cidkasta akhlaaq wanaagsan, sababtoo ah

Akhlaaqda wanaagsan iyo habdhaqanka suuban wuxuu ka qurux badan yahay quruxda wajiga waayo hal qalbi oo qurux badan ayaa ka wanaagsan oo ka qurux badan boqol waji oo qurxoon,

Akhlaaqda wanaagsan waxay uqeybsantaa dhoor qeybood balse qodobo ka mid ah ayaan soo qaadan doonaa.

1:Hadalka wanaagsan: qofka akhlaaqda wanaagsan hadalkiisuna wuu wanaagsan yahay, dadka wanaagooda wuu ku ammaanaa, qofkii xumeeyana wuu uqoslaa oo wuu wanaajiyaa.

2:xiriirinta qaraabada: waa mid ka mid ah dhaqamada uu allaah (sw) ugu jecel yahay waxaana laga dhaxlaa (cimri dheer iyo xoolo badnaan IWM.

3:sadaqada: qofka akhlaaqda wanaagsan sifooyinkiisa waxaa ka mid ah sadaqada oo uu siiyo dadka faqiirka ah iyo kuwa kale ee ubaahan,waayo qalbi dahab ah ayaa allaah ku maneeystey, qofka wax bixinta badan waxaa uu ogyahay in ay sadaqadu

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

tahay camalka wanaagsan ee uu illaahey jecel yahay.

4:Samafalka: qofka wanaagsan meel kasta ee uu tago samafalkiisa majoogsado, qofkii wanaag sameeyana xumaanta ayay ka dhowrta, dhibaatadana weyka hortagtaa, akhlaaqda wanaagsan waa sida jowharadii oo kale waana furaha nolosha waxayna iftiimineysaa noloshaada oo dhan dadka lama siin oo looma hibeyn wax ka wanaagsan oo ka qeyr badan akhlaaqda wanaagsan.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Dabeecada

Waa maxay dabeecada wanaagsan

Dabeecada wanaagsan-waa hantida ugu qaalisan oo uu qofka ku lahaado bulshada dhexdeeda.

dabeecada wanaagsan waxaa ay kulmisaa wanaaga oo idil,qof walbana waxaa uu jecel yahay inuu noqdo qof dabeecad wanaagsan, nabigeena (N.N.KH) wuxuu yiri"waxaa la,iisoo direy inaan dhimeystiro akhlaaqda"halkaas waxaad ka ogaaneysaa qiimaha ay leedahay akhlaaqda wanaagsan iyo sida wacan ee diinteyna nala jeceshahay wanaaga.

Allaah (sw)waxaa uu na amray inaan dabeecad wanaagsan kula dhaqanno dadka oo dhan,muslim iyo gaalba waayo cadaalada,iyo ixsaan falka naxriista waa dabeecada qofka muslimka ah ka muuqato anshaxa hadalkiisa, hubaal alle waxa uu jecel yahay kuwa ku dhaqma cadaalada.

Dabeecada wanaagsan waxaa ka mid ah:

1:bulshada aad la nooshahay waa in aad ixtiraamtaa.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

2:waa in aad cafinta badisaa.

3:waa in aad dadka caawisaa.

4:waa in aad dadka oo dhan unaxriisataa.

intaan iyo in ka badan aanan qoraal kusoo koobi karin qofkii laga helo ayaan dhihi karnaa waa dabeecad wanaagsan yahay.

Qof kasta oo muslim ah waxaan ugala talin lahaa in uu badiyo hadalada wanaagsan.iskana dhaafo kalmadaha "xun xun"sida "waryaa"nayaa"lWM,

Waayo hadaladaas mawanaagsano in lagu dhawaaqo. Nabigeena moxamad (N.N.K.H)wuxu yiri

Kalimada wanaagsan waa sadaqo,in aad ku hadasho hadalo wanaagsana waxay iftiimineysaa noloshaada.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Xishoodka

Waa maxay xishoodku

Xishoodku waa dhaqan suuban, waa dhaqan illaahey jecelyahay, waa dhaqan iimaani ah, waa dhaqan rasuulkeena (scw) ku tilmaamey in uu ka mid yahay laan ka mid ah laamaha iimaanka

Waxaa nabigeena moxamad (N.N.K.H)ka sugan in uu yiri:((iimaanku waa dhowr iyo lixdan laamood, laanta ugu sareysa waa laa'ilaaha ilaa' laahu muxamadu rasuulu allaah. Waxaana ugu hooseeya, wadada oo laga leexiyo waxa dadka dhibaayo xishoodku waa laan ka mid ah laamaha iimaanka)) xishoodku waa qeyb ka mid ah iimaanka.

Xishoodku waa shay qaali ku ah islaamka dhexdiisa, qofka muslimka ah ee xishoodka badana wuxu ka qiimo badan yahay dadka kale ee caadiga ah, waayo wuxuu dheer yahay kheir, saa waa tan rasuulkeena (scw) yiri"xishoodka lama yimaado waxaan kheir aheyn.

Xishoodku waa xijaabka muslimiinta oo dhan, xumaantu ka dhowra samahu uweecsha,

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Xaqeyna uleeyihiin iney xishoodaano, waa sunadii xabiibkeyna moxamad (N.N.K.H).

Xishoodka gabadha muslimada ah

Gabadha muslimada ah waa in ay marwalba asturnaadaa jirkeeda kuna nagaata gurigeeda waayo

asturnaantu waa qeyb xishoodka ka mid ah, waa farqiga udhexeeyo noolaha aan caqliga lahayn iyo bini aadamka, iney cowradaadu dedan tahay waa waxa ugu horeeyo ee ay tahay inaad hubiso, ogow xishoodku waa qurux, wuxuu kaa celiyaa xumaha, kuguna qalqaaliyaa samaha.

Xishoodku waa camal illaahey (sw) jecelyahay wuxuna iftiiminayaa noloshaada xishoodka waajib kuma ahan dumarka oo keliya misaba raga oo keliya balse waxaa uu waajib ku yahay qofkasta oo muslim ah qofkii xishoodka ku dadaala illaahey (sw) ayaa jeclaanaya.

(قال رسو ل الله صلي الله عليه وسلم

ان لكل دين خلقا وخلق الا سلا م الحياء)

Gabay waano dumar

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Jaceylku waa eegid ka fikirid ka dibna talaabo, indhaha celi, fikirka tuur, talaabada diid, walaasheyda macaan waxaan ku dhihi lahaa,

- *Guraca diid gefkoodana ka guur*
- *Gaabso hadalkaaga gagabeyso*
- *Goortey guntey ceelka ka agoogto*
- *Kana guro nimaan kula gureyn*
- *Garab carowgaaga garab waa ka eebe*
- *Ninkaan xaaji garaneyn garowsiiyo*
- *Jeer uu ka heley ha u gargaar fidin.*

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Samirka iyo dulqaadka

Waa maxay samir iyo duqaadka

Samirka iyo dulqaadka waa inaad isku haleyso gargaarka illaahey (sw).

Qeexida samirka:

Samirka waa daawada cudur kasta, waayo hadii aad daawo qaadaneysid xitaa daawada waxay kaaga baahan tahay samir aad qaraarkeedu ku xamisho,wakhtiga uu dhaqtarka kuu qabtey inaad cabto.

Qeexida dulqaadka:

Dulqaadka waa inaad iska dhaafi karto ficil aad sameyn karto oo aad awood uleedahay, **Tusaale:**

Hadii uu qof adiga dhib kuu geeysto oo aad adigana awood uleedahay dhibka uu kuu geestey mid la mid ah inaad ugeeysan karto, oo aad iska cafiso ayaa loo yaqaanaa dulqaad.

Qiimaha samirka iyo dulqaadka:

Qofka oo sabra, isla markaana udulqaato dhibaato

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

ay soo gaartey waxa ay ka mid tahay akhlaaqda wanaagsan ee qof yeesho,waana astaan muujineysa iimaanka qofka, kaasi oo udiidaya naftiisa inay ku dhaqaaqdo ficil xun.

Qof walba waxaa uu lee yahay labo awood oo ushaqeeyo naftiisa, mid waa awood qofka ku riixeysa saameyta ficil xun, mida kalena waa awood qofka ka celisa ama ka hor joojsata ficilo kale.

marka samirka waxa si tayo leh, isku xiraa awooda qofka u horseeda sameynta ficilada wanaagsan iyo awooda qofka ka hor joogsata ee u diida sameynta ficilada khatar ku ah naftiisa iyo bulshada kaleba.

<u>Samirka iyo dulqaadka waa wadada guusha</u>

Marka aad rabto inaad nolosha guul ka gaarto ha moogaan samirka iyo dulqaadka, oo ah labada shey oo nolosha laga maarmi karin si aad ugu badbaado guul daro. Samirka waa sahayda guusha dulqaadkuna waa shidaalka,

Samirka waa halbowlaha shey walba oo la qabanayo,

Samirka waxaa uu utaagan yahay arimaha, halka uu

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

madaxa ugu taagan yahay jirka,

Samirka waa hoyga halyeeyada aduunka, lama arag aduunka nin libaaxa hadii la arkeyna waxaa uu ku mutaystey halyeeynimada adkeysi iyo u dhabar adeyg uu u dhabar adeygo dhibaatooyinka soo maraya.

Hadaba aduunka lama arag cid bilaa samir ah oo guuleysata. Maxaa yeeley marka aad mareysid wadada guusha waxaa kaasoo hor bixi ama kusoo wajihi:guuldarooyin farabadan,caqabado,niyad jab,han jab iyo quusasho,laakiin waxaas oo dhan waxaad kaga bixi kartaa samir iyo dulqaad.

Soomaalida waxay ku maahmaahdey "nin sabraa sed leh".

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Ixtiraamka

Waa maxay ixtiraamka

Ixtiraamku waa akhlaaq iyo anshax wanaagsan,

waxaa uu kaa celinayaa ficilada xun kuna farayaa wanaag fara badan.

ixtiraamku waxaa uu muhiim uyahay cilaaqaadka aadanaha iyo in lagu noolaado wada noolaasho bulshada dhexdeeda ah,

ixtiraamku waa xaq sidoo kalana waa waajib, sidaa darteed waxaa lagama maarmaan ah qofka inuu ogaado mar walba muhiimada ay uleedahay nolol maalmeedka dadka.

Ixtiraamka bulshada ka dhexeeyo

ixtiraamku waxaa uu ka mid yahay waxyaabaha xoojiya bulshada xiriirka ka dhexeeya, waxaa uuna ka mid yahay waxyaabaha dadka qalbiyadooda lagu hanto, waana udub dhexaadka ladhaqanka wanaagsan ee bulshada,

Hadaba,saameyn intee la`eg ayuu ixtiraamku

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

bulshada ku dhaxyeeshan karaa?

Bulshada marka ay is ixtiraamayaan waxaa ka dhalato xasilooni qalbiyeed, ixtiraamka waa dareen muujinaya fiicnida iyo qadarinta ay dadka lee yihiin, bulshada marka qofba qofka kale ixtiraam umuujinayo waxaa ka dhalato iney isjeclaato oo ay is ku dhawaato, markasta oo bulshada xiriirkooda xoogeystana waxay muujinaysaa horumar bulshada iska duubnidooda.

Talaabooyinkaan hadii aad raacdo waxaad noqoneysaa qof ixtiraam badan,

1:iskusoo wada duub oo naftaada ixtiraam

2:ruux walba ixtiraam si laguu ixtiraamo

3:Noole kasta waxaa uu mudan yahay ixtiraam, hanoqdo qof khashuucsan, mid kibir badan, mid fool xun amaba mid qurux badan.

4:waxaan si adag u aaminsanahay in ixtiraamku aad u muhiimsan yahay kana weyn yahay caannimada.

5:Qofkasta oo wax ibarey wuxuu iga mudanyahay

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

xushmad iyo tixgalin.

6:marka ragga iyo dumarka is ixtiraamaan oo ay aqbalaan khilaafaadkooda, markaa jeceylku wuxuu fursad u haystaa inuu kobco.

7:sii qofkasta oo bini aadam ah xuquuq kasta oo sheegato naftaada.

8:waa in aad ixtiraamtaa ra`yiga dadka kale xitaa hadii aadan raacsaneyn ra`yigooda .

9:umuuji ixtiraam fikradaha dadka kale.

10:jeceylku waa daacadnimo, jeceylku waa naxriis uu illaahey (sw) ku beerey adoomadiisa qalbiyadooda si ay isugu naxriistaan midba midkooda,

11:qofkasta oo aan lahayn geesinimo uu uga hadlo xuquuqdiisa ma kasban karo ixtiraamka dadka kale.

12:kii raba ubax waa in uu uxtiraamaa qodaxda.

13:is ixtiraamku waa dharka ugu sharafta badan iyo dareenka ugu sareeya ee ku haboon maskaxda qofka.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

14:ixtiraamku waa mid ka mid ah muujinta ugu weyn ee jeceylka.

15:wax qiimo dhab ah lama iibsan karo sida:

jeceyl, saaxiibtinimo, sharaf, qadarin, iyo xushmad, waxyaabahaas oo dhan waa in la kasbadaa.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Ku dhaqan cadaalad

Waa maxay cadaalad

Cadaaladu waa kasoo horjeedka dulmiga, waxaa looga jeedaa waxkasta oo aan dulmi ahayn waa cadaalad,hadii meesha dulmi soo galana cadaalada ayaa ka baxeysa.

Dulmiga waa waxkasta oo aan si ku habooneyn loola dhaqmay, cadaaladana waa waxkasta oo sidii ku habooneyd loola dhaqmay,waa isku cagsi, waxaa kale oo cadaalada muuqaaladeeda ka mid ah sinnaanta, toosnaanta, miisaanaanta, hadii meesha sinnaanta ka baxdo cadaaladi ma taalo, hadii toosnaanta ka baxdo qalooc ayaa soo galaya oo cadaalad jirimeyso, hadii miisaanka saxda ahi meesha ka baxana dheeli ayaa soo baxaya oo cadaalad majirayso,

islaamku cadaaladu meel sare ayuu gaarsiiyey, qiimaha iyo sareynta halka laga gaarsiiyey waxa lagu tilmaameyna mid ka mid ah magacyada alle (العدل) illaahey waa caadil, waxa uuna jecel yahay

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

cadaalada, magacyadiisa waxa ka mid ah (العدل),

cadaalada iney noqoto magacyada alle waxay ku tusineysaa qaalinimadeeda iyo muhiimada ay uleedahay dadka iyo dowladnimadaba, waxay ku tusaysaa cadaalad la,aan in la noolaan karin, sidaa darteed islaamku waxa uu diidey qofku xitaa naftiisa inuu dulmi ku sameeyo.

{ان الذين توفا هم الملا ءكة ظا لمي انفسهم

النساء٩٧

"kuwa malaa,igtu nafta ka qaadeyso iyagoo dulmiyey naftooda"

dadka aayadani kawarameysa ma aha kuwa dulmi iyo dhib ugeeystey dad kale balse waa dad naftooda oo kaliya dulmiyey oo dhib ugeeystey, waxaana aayadu tilmaameysaa naftu iney cadaalad ubaahantahay, hadii naftu cadaalad lagu hagi waayana dulmi iyo dhib iney imaaneyso, maalinta qiyaamahana waa laweydiin doonaa qofka muxuu naftiisa ugu cadaalad sameeyn waayey.

Quruxda dhabta ah

Waa maxay qurux sideena loo ilaaliyaa

Sida ugu fiican ee quruxda loo ilaaliyo,

Quruxdu waa nimco uu ilaahey (sw) siiyey adoomadiisa nimcadaas waxa ay ubaahan tahay ilaalin, hadaba ma ahan qurux in loo maleeyo sida ay maanta dadka lunsan u fahamsan yihiin, samankaan waxaad arkeysaa qof wata dhar jeexjeexan waxaa lagu leeyahay waa casri waa hormar, taas waxay kuu tilmaameysaa dad badan ineysan fahamsaneyn quruxda waxay tahay.

Hadaba waa maxay quruxda dhabta ah? sideena loo ilaaliyaa?

Quruxda waa qaabka fidriga ah oo alle ku abuurey aadanaha quruxdu waxa ay ka kooban tahay maaddi iyo micne ma ahan keliya qaabka ama bidhaanta quruxda caqliga, quruxda hadalka, quruxda dhaqanka, quruxda nadaafada, quruxda toosnaanta

intaasoo dhan waa qurux,

hadii ay tahay gabadha mid qurux badan oo ay la,dahay quruxda akhlaaqda, caqliga, qalbiga wanaagsan, miyaa lagu tilmaami karaa qurux, runtii qofkasta oo wax garad ah wuu dareemi karaa quruxda ineysan ahayn mid yar ama fudud, mana ahan dhaqamada maanta ay dadka qaar ay ufisiraan quruxda oo dad badan ku raaceen,

Quruxda hadaan fannahay waxaa la rabaa inaan ilaalino quruxda waxa lagu ilaaliyaa in la fahmo jidka toosan, akhlaaqda, wanaaga, nadaafada, suubanaanta.

Qofka Waxyaalahaan ka tago oo ka leexdo wadada toosan lama dhihi karo qurux buu leeyahay waayo jidka uu marayo ayaa ah jid qalloocan,

Tusaale ahaan: waxaad arkeysaa gabar ama wiil oo surwaal jeenis ah si xun ujeexjeexan xiran, wuxuuna uheystaa inuu hormar gaarey,

qofkasta wuxuu raadiyaa wax qurux badan qof guur u baahan wuxuu raadiyaa gabar qurux badan balse

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

aragtida ayey ku kala duwan yihiin,

hadii aad rabto inaad ogaato quruxda saxda ah waa in aad unoqoto diinta xaqa ah ee islaamka sidey u aragto midaas ayaa sax ah.

Sidoo kale diinta islaamka waxay kuu sheegtey quruxdaas sida loo ilaaliyo oo loo xafidayo waa in aad ka fogaataa wixii lagaa reebey adigoo sameynaya wixii lagu amrey.

Iftiimi noloshaada

Qiimaha qalbiga uu leeyahay

Waa maxay micnaha qalbiga

Qalbiga waa cad yar oo ku yaalla korka dhiniciisa bidix ee laabta (wadnaha) macna ahaan luuqada carabiga waa (fu,aadka) insaanka oo illaahay ka hadlay,waana guriga/hooyga iimaanka, taqwada, ixtiraamka, dikriga, jeceylka iyo nabadgalyada,

Sidoo kale waa guriga kufriga, nifaaqa, riyaaqa xiqdiga, xaasidnimada, kiraahyada iyo walwalka,

Qalbiga haduu dhinto, naxriista ayaa tagta, caqligu haduu dhinto, xikmada ayaa tagta, damiirka haduu dhintana wax walba ayaa taga.

Qalbiga wanaagsan

Qalbiga wanaagsan oo toosan waxa lagu gartaa calaamado kuwaasoo kaga duwan yahay qalbiyada dadka kale,

- Qalbiga wanaagsan waa mid ulaabasho mudan una towbo noqod badan rabigeena sareeyee.
- Qalbiga wanaagsan waa kan kamaran xumaanta

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

illaaliyana akhlaaqda wanaagsan kana fog dhaqanka xun.

- Qalbiga wanaagsan xaasidnimo iyo xiqdi iyo caro uma qaado dadka kale.
- Qalbiga nabad galay waa mid raali ku ah kuna qanacsan qadarta iyo maamulka illaahay ee ku saabsan amuuraha aadanaha oo dhan.
- Qalbiga suuban waa mid og in dunida marin tahay oo ay dhamaaneyso.

Inta badan qofka qalbiga toosan waxaa uu ku xiran yahay eebbe wuxuuna ogyahay in aakhiro jirto.

- Qalbiga toosan waxa uu farxad ka helaa illaahay (sw) inuu udhawaado illaahay ayuu jecel yahay wuuna tala-saartaa wuxuuna ku xasilaa xuska eebe sareeyee.
- Qalbiga nabad galay inta badan illaahay ayuu amaanaa xusaa iskuna mashquuliyaa wax wax anfaca dadkana anfaca.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

- Qalbiga toosani waxa uu dareemaa daal murug iyo ciriiri hadii maalintiisa ku waayo xuska eebe kana tago wardigiisa maalinlaha ahaa iyo akhrinta hadalka eebe awood badnaayee oo qur aanka kariimka ah.
- Qalbiga wanaagsan howshiisa waa raali galinta alle waxa uu ictiraafsan yahay noloshiisa oo dhan illaahay inuu leeyahay.
- Qofka muslimka ah maalintii iyo haweenkii waxa uu ku dadaalaa gudashada salaadaha oo dhan markuu guto waajibkiisa salaadeed bilowga aroortii qalbigiisa waxaa uu dareemaa farxad iyo rayn rayn wuxuuna helaa degenaan.
- Qalbiga wanaagsan haduu danbaabo gefna ka dhoco wuu xanuunsadaa wuuna ka qoomameeyaa danbi galid oo dhan ha yaraado ama ha weynaado.
- **Qalbiga wanaagsani waxa uu ku dadaalaa inuu qabto camal suuban shaqo walbana sidey tahay ayuu uqabtaa.**

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

- **Qalbiga wanaagsan waxaa uu aaminsanyahay illaahay jiritaankiisa wuxuuna raacaa rasuulka fariimihiisa maalinta qiyaamahana wuu yaqiinsanyahay.**
- **Qalbiga suuban ma dhibo dadka la xariira dadka ku hareereysan.**

Ugu dambeyn inta ay goori goor tahay isa sax oo hagaaji diintaada, dhaqankaaga iyo camalkaaga, illaahay qalbiyadeena ku sugo diinta islaamka ah aamiin aamiin.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Nolosha wanaagsan

Waa maxay nolosha wanaagsan

Nolosha wanaagsan waa tan liibaantey aduun iyo aakhiroba, waa tan ku dadaasha marwalba raali ahaanshaha illaahay, waa tan rumaysan iney jirto aakhiro,waa tan marwalba qaadata wixii illaahay iyo rasuulkiisa amreen kana fogaata wixii laga reebey,aaminsanna jiritaanka illaahay,

Qofka ugu nolosha wanaagsan ma ahan kan ugu hantida badan ama ugu caafimaadka wanaagsan, balse waa kan ku xiran marwalba illaahay (sw) oo raacay wixii illaahay (sw) faray kana haray wixii loo diidey,

Nolosha intaada qaraar ee dhibka leh, waxaa ka badan inteeda wanaagsan ee dhadhanka macaan leh, iyadoo lagu haminayo waxa allaah (sw) agtiisa yaalla ayaa ah farxada iyo sacaadad dhameystiran.

Aduunyadu waa mid liidata, balse jannada waa qaali waana darajooyin, waxa ugu sareysa jannada firdowso.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Qof waliba waxaa uu jecel yahay inuu ku noolaado nolol wanaagsan, balse dadka intooda badan ma aqaanaan wadada loo maro nolosha wanaagsan, sababta oo ah wax waliba waxaa ay lee yihiin waddo loo maro, ***Tusaale:***

Hadii aad rabto inaad noqoto qof duuliye ah aadan tagin goobta lagu barto duuliyaha, balse aad tagto goob lagu barto ganacsiga makula tahay inaad dayuurada aad duulin kartid. sidoo kale qof walba oo wax garad ah wuu dareemi karaa su,aashaan jawaabteeda, hada hadalka oo kooban, hadii aad rabto inaad noqoto qof ku nool nolol wanaagsan waa in aad raacdaa waddada loo maro, mida kale meelkasta oo aad ku sugan tahay waa in aad mar walba xasuusnaataa jiritaanka illaahay (sw).

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Guusha dhabta ah

Waa maxay micnaha guusha

Guusha waa himilo iyo hiigsi aad leedahay oo aad gaarto, mana ku timaado haglo laaban,sahal,fikir,gaabni,hami yari iyo samir yaraan toonna.

Guusha waxa go,aamiya hanka, hiigsiga iyo humaagyada mustaqbaleed ee qofka meel dhigtey,markaas waxay ka dhigan tahay, nin waxa guul u ah ayaa mid kale u ah bilowga hayaanka guuleed ee uu hiigsanaayo,

Guusha waa helida dhamaan waxaad ka dooneyso nolosha amise fulinta qorshihii aad hore udajisey, islamar ahaantaana guusha waa adoo kaca aroortii adigoo farxad dareemeya oo aan dareemayn ciriiri iyo diiqad.

Waxka baro astaamaha guusha:

1.Dajinta hami iyo hiigsi: Isbedel joogto ah:dhamaan dadka raba iney nolosha ka sameyaan

wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

guul waxay naftooda ku qanciyaan inuu isbedel waajib yahay, waxay hoos iyo korba dadka uu codkooda gaaro ugu sheegan in isbedel loo baahan yahay, waxa mararka qaar dhacda in lagu arko qof qaldan balse waa wax nolosha ku caadiya.

Nabi muxamad (scw) ayaa tusaale fiican kuugu ah, iyo dhamaan dadka nolosha horumar ka sameeyey midkastood noloshiisa baarto.

2.in aanad mar labaad sameyn khlalad aad horey usameysay: Taasi micnaheedu ma ahan in hadii aad shey ku guuldareysato, in mar kale ku guuldareysaneyso, laakiin waxa ay tahay in aad waxka barato khaladaad kaagii hore ee aad khaladkaaga waxka baratid, ee aanad ku socon waa wadada guusha.

3.Dadaal dheeraad ah: dhamaan dadka macnaha sameeyey ee kugu xeeran haday noqoto shiikh iyo shariifba midkasta wuxuu goostey wuxuuna beertey,

Midkasta wuxuu ku noolaanayaa habeenkiisa iyo maalintiisa intu gashaday, taasi waa sababta dadka

kala sareeysiisey, ee guuleyste iyo guuldareyste ka dhigtey.

4.samir iyo dulqaad: dhamaan qofkasta oo noolosha horumar ka gaaray kumuu san gaarin saacad, maalin iyo habeen toonna ee waxa loo baahan yahay samir iyo dulqaad si aad unoqoto guuleyste.

5.Go,aan iyo xoog saarid: ma jiro qof meel gaarey oo fikirkiisa dadka ku qancin, waxaa loo baahan yahay waxa aad qabaneysid iney noqdaan wax ay kaa go,antahay sidoo kalana aad xoog saartid waxa aad qabaneysid, dhamaan dadkii xooga saarey ay kana go,neyd waxa ay qabaneyaan waxa ay ahaayeen dad macna ka sameeyey noloshooda kuna qancay.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Sameyso saaxiib wanaagsan

Waa kuma saaxiibka wanaagsan

"Hadii aad ka cabsan jirtey kelinimada (cidlada) hada ka cabso iney saaxiib kula noqdaan dad xun balse ogsoonow ineysan jirin dunida qof dhamaystiran"

Akhriste qofka aad saaxiibka la noqoneyso iska eeg, ma qof wanaagsan baa mise waa qof xun kana eeg xagga:

- Dhaqanka
- Dabeecada
- Aqoonta
- Saaxiibtinimada maxariiriyaa mise waa labo cisho uun bes.

Maxaan ku gartaa saaxiibka wanaagsan? Astaamihiisu waa sidee?

Waa sidaan soo socota:

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Saaxiibka wanaagsan waa midka dhaqankiisu wanaagsan yahay oo had iyo jeer wanaag ku fara adigana, xumaantana kaaga diga.

Saaxiibka wanaagsani waa kan markasta ku xasuusiya illaahay cabsidiisa,is hortaaga illaahay kaagana diga qabri iyo qiyaame.

Saaxiibka wanaagsan waa kan ku bara dulqaadka, deqsinimada iyo samirka markastana dadka kale kaaga sheekeyn xumaantooda.

Saaxiibka wanaagsan waa kan markasta ka muuqda meelaha kheyrka sida:

- Masaajidada, madaarista iyo goobaha cilmiga iyo meelkasta oo wanaag lagu hayo.

Saaxiibka wanaagsan waa kan kugula taliya danahaaga kuguna dhiiri galiyo wixii danahaaga ku jiro.

Saaxiibka wanaagsan waa kan kula farxa markaad faraxsan tahay markaad murugeysan tahayna ku sabarsiiya. markaad carootana ku qabta.

Saaxiibka wanaagsan waa kan hadalkiisa ku dhiiri

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

galiya kuna soo jiita dareenkiisa.

Gabay ka hadlaya saaxiibka

- ***Sumada dhacdadiyo xilliga,***
- ***Bilaha sanadkiyo qarniga,***
- ***Sooyaalka qadiimigee,***
- ***Sameyska aduunyadiyo,***
- ***Saanqaad leh aadamiguye,***
- ***Ilaa sabaankani casrigu,***
- ***Casrigu ku qeexay siyaasigu,***
- ***Soodh laba af lahe,***
- ***Saaxiibku waa halbeeg,***
- ***Sidig ku ah naftoo kalsooni ku siiya,***
- ***Sadriga qeyb buu ahaa,***
- ***Sidaha wadnuhu ahaa,***
- ***Saldhiga tashiguu ahaa,***

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

- *Siraad baxayuu ahaa,*
- *Dul qaad buu ahaa,*
- *rajada hanka lagu sabuu ahaa,*
- *Subaga maskaxduu ahaa,*
- *Saaxiibku wuxu ahaa sideed hooyadu dhashiyo,*
- *Sokeeye mid kaa xiguu ahaa,*
- *Sirtaaduu xafidaa,*
- *Saaxiibku wuxu ahaa hiilkii sumcadaadiyo,*
- *Seef aad ku dagaal gashiyo,*
- *Sama waduu ahaa,*
- *Saaxiibku wuxu ahaa kasoo hara,*
- *Maalintey daneystiyaashu socdaan,*
- *Qabyaalad sunteediyo qadiyad sooc kuguma daayo,*
- *Saaxiibka wanaagsan sinaba kuma kala haraane,*
- *Markaad hilib soorataan waxaad saami uhesho,*

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

- *Sadkaaga in kuugu daraaye,*
- *Saaxiibka wuu sareeyaa,*

Kalsoonida nafta

Waa maxay kalsoonida nafta

Kalsooni waa dareenka aad ku qabto naftaada ama waa wax aad ku rumeysan tahay naftaada, kalsoonida nafta waa lafdhabarta guusha.

Hadaad isku aragto qof wax qabsan karin, nolosha ka dhacsan, ayaan daran, sidoo kalana aad ku qabto naftaada aragti taban oo baqdin iyo saluug badan ku jirto qofnimadaada ogow waxaad noqoneysaa col hartiisa jabay! adiga iyo guuli isma arkeysaan, waayo guusha waxay umartisaa qofka naftiisa ku kalsoon.

In aad naftaada ku kalsoonaaato ma ahan ujeedkeeda in aad tahay qof islaweyn, hadaad tahay qof isla qabweyn oo aan dadka ula dhaqmin sida wanaagsan taasi ma ahan kalsooni balse waa cudur nafeed ah, marka waa lagama maarmaan in aad naftaada ku kalsoonaato boqolkiiba boqol *100%* oo aad ku hanweynaato inaad tahay qof milge leh oo

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

wax qabsan kara.

Kalsoonida nafta waa lafdhabarta guusha hadii ay kalsooni jirin wey adag tahay in aad si qurux badan u guuleysato.Dhanka kale, kalsooni darada waxay lafdhabarta ka jabisaa guusha waxayna ka dhigtaa qof aan dhaqaaqi karin waayo waxa ay kugu beereysa cabsi aan jirin Iwm.waxay ku faraysaa walwal iyo walaahow kaa gala waxa aad is leedahay ku dhaqaaq "ma aqaan, wey adagtahay, wey culustahay, dadka kugu yaabaya, suurto gal ma ahan."

fariimaha waa kuwa kugu ridaya walaac aad ku garato hayaankaaga iyo hiigsigaagii qofeed.

Kalsooni darada waxay mararka qaar saameyn ku yeeshataa nolosha qoyska, shaqada iyo waxbarashada, hadaad tahay ruux jilcan oo aan naftiisa ku kalsooneyn, wey kugu adkaaneysaa sidii aad u rumeyn lahayd dhibaatooyinka kusoo food saara.

Dhanka kale, diinteena islaamka waxay na baraysaa in aan noqono kuwa leh kalsooni buuxda dhinac

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

kasta kaliya aysan ahayn wax ku saabsan nolosha ee ay tahay sideedaba aan la imaano go,aan qaadasho ku dhisan kalsooni, waayo alle (sw) waxa uu leeyahay "waxaad talo saarataa allaah aan dhiman oo nool markasta taasina waa arrinta ugu adag ee ku bareyso in taladu ay tahay mid alle oo kaliya."

Si kastaba, guusha iyo guuldarada ma aha wax mar keliya dhaca ee waa dhaxalka dadaal socday aamin badan, markaad diido in ay ku hakiyaan martooyinka iska horyimid ee weerar joogta ah ku haya yoolkaaga, laseexato kuna soo toosto markaas ayey duluc weyn yeelaneysaa kalsoonida nafta.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Maareynta wakhtigaaga

Waa maxay maareynta wakhtiga

Maareynta wakhtiga (Time managament) waa hanaan aasaasi ah oo u baahan, laqabsasho, tababar, xirfad, agab, qaab shaqo isku xiran oo kugu caawinaya inaad qiimo badan siiso kor uqaadista tayada wakhtiga noloshaada.

Muhiimada inaad wakhtigaaga qaabeysaa macnaheedu maaha, wax_qabad badan aad sameyso, maxaa yeeley waxaa taas ka mudan inaad ku howlan tahay tacab miro dhal leh, in juhdiga iyo dadaalkaagu ku wajahan yihiin jihada saxda ah.

10_ka qodob ka dooro inta kaa anfacaysa. kuna dadaal inaad fuliso oo aad caadi ka dhigato ka faa, idaysiga bar kasta oo wakhtigaaga ah.

1. **Qor oo qaabee amuuraha:** qaladaadka guud ee wakhtiga haleeya waxa ka mid ah inaad isku haleyso xasuustaada oo aad macluumaad badan ku

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

keydiso taas oo ugu dambeyn buux dhaafisa maskaxda, wax badan aad iloowdo, inaad liis garayso oo qorto shey kasta waxay kuu awood siineysaa inaad xadido wakhtiga mashaariicda iyo amuurahaaga adiga oo ufulinaya si abaabulan.

2. **Ukala gur siday ukala mudan yihiin:** waxa la yiri oodo dhacameed sidey ukala sareeyaan ayaan loo kala gura, waa lagama maarmaan inaad liis garayso sida amuurahu ukala mudan yihiin adiga oo diirada saareya wakhtiga aad ku wajaheyso xaajooyinka sida dhabta ah usameynaya mustaqbal_kaaga. U calaamadi liis kaaga siday ukala horeeyaan.

3. **Qorshee usbuucaaga:** wakhti sii bilowga usbuuc kasta qorsheynta jadwalkaaga. Wakhti dheeraada inaad tan siisa waxay kaa caawinaysaa sare ukaca wax soosaarkaaga iyo dheeli tirka, mashaariicda wadada dheer leh iyo kuwa muhiimada gaarka ah leh. Waxa keliya oo aad u baahan tahay 15 ilaa 30daqiiqo aad qorsheyso wiigaaga.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

4. Ku dheganoow buug yare haagi (note book)

Ma ogid goorta ay kugu soo dhacayso fikrad wanaagsan ama qorshe qiime lahi. Waa inaad sidato buug_yare markasta aad baxayso si aad uweelayso arragtida cusub. Hadii aad sugto wax xooga waxa laga yaabaa inaad ilowdaba. Waxaad kale oo aad isticmaali karta inaad digital recorder ku keydsato macluumaadkaaga (hadaad haysato).

5. Baro inaad maya tiraahdo: marar badan ayaynu la khadyaanaa mashquul dartii sababta oo ah waxa aynu balan qaadney ee ina sugaya inaan fulino iyo waxa aynu qaban karo ayaa kala badan.

Waxa aynu dhahnaa haa iyadoo runtu maya ahayd. Bari inaad maya tiraahdo waxa aan daruuri ahayn si aad wakhtiga ugu hesho kuwa muhiim ah.

6. Inta aanad falin ka fiirso: imisa jeer ayaad balan qaadey wax aad hadhow ka qoomameysay? inta aanad balan qaadin mashruuc cusub, waa in aad si qoto dheer ah ufiirsataa wakhtiga uu u

baahan yahay, tani waxa ay kaa xijaabeysaa shaqo badan oo aanad udaaqad hayn.

7. **Joogtee oo kobci aqoonbtaada:** jadwalkaaga ku darso wakhti aad wax cusub ku barato, si aad u hormariso awoodaha dabiiciga ah ee eebe kugu galadey iyo kalsoonida shaqsinimada. Aqoontu ma dhamaato, heerkasta aad waxbarashada ka gaartana wax uun baa kaa dhiman, isku day inaad wax kororsato,Tusaale ahaan, waxaad maalintii saacad xaadiri kartaa tafsiirka, waxaad saacad siin kartaa akhrinta buugaagta iyo magazine_da aad jeceshahay,(khaasatan kuwa la xariira field_kaaga).

Harumarinta aqoon taada iyo fikradaada waxay kor u qaadeysaa hal abuurnimadaada, wa ayna quweyneysaa darajadaada shaqo, waana wax hiilkii tagtaba kugu anfacaaya,hadii aanad wa baranayn adiga dadka wax bar oo ugu faa idee aqoon taada . Wixii aad bartaaba (amxaariba ha ahaatee) wey anfaceysaa, waa sadaqo jaariya, sharafna waabay kuu tahay.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

8. **Dib uqiimee wixii isbedel u baahan xarakaad kaaga:**waa fikrad wanaagsan inaad joogteyso qiimehnta sida aad u isticmaasho wakhtigaaga. Sidaa darteed, wey fiican tahay inaad jadwalka ka saarto wixii u muuqda inaanu miro dhal lahayn ama u adeegeyn danahaaga, si aad wakhtiga u buuxiso mashruuc kale ka qiimo badan.

9. **Calaamadii caadooyin kaaga liita:** usamee liis caadooyin kaaga liita ee wakhtigaaga galaafta, curiyaamiya horumarkaaga, daboolo guulo aad gaari lahayd, marka aad aqoonsato, u hawl gal sida ugu macquulsan ee caadada aad walaftey aad ugu samote bixin lahayd naftaada. Ogsoonow sida ugu sahlan aad caadooyinka xun ku jari kartaa waa adoo qaar wanaagsan dhankooda ku buuxiya.

10. **Hayso himilo aad hiigsaneyso:** markasta waa in hadaf iyo meel hiigsaneyso oo ugu sareysaa ay jirtaa. Samee buuga hadafka (a gaol journal) oo qor talaabo kasta oo aad xaga horumarka u qaado. Ugu yaraan halmar usbuucii booqo xasuus qorkaaga oo hubi inaad ku taagan tahay jidkii saxda ahaa.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

tobon kaan qodob waa qaar qofkii joogteeya wuxu u suurto galinayaa wakhtigiisa inuu ugu faa idaysto sida ay tahay. Fadlan mar walba maanka ku hay in wakhtiga uu yahay waxa ugu qaalisan ee hantidaada. Ogoow daqiiqadii ina dhaaftaa masoo noqoto badelkeedana ma helo, cimrigeenu un baa ka go,anta. Wixii aad maanta kabsan karto beri hawdhigan. Aakhirona waa lama horaankiiyee isku day inaad cibaadada illaahay u hogaansanto. illaahow toobada nagu noolee oo nagu dil, aamiin.....

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Dhoolo cadeynta

Waa maxay dhoolo cadeynta

Dhoolo cadeynta iyo muusoodka waa astaan ka marag kacaysa, farxad, furfurnaan iyo soo dhaweyn.

Dhoolo cadeyntu waxay si fudud u saaqdaa qof walba waxaanay qalbiyadeena galisaa dareen muxubo, jeceyl, iyo kalsooni daarran.

Qiimaha dhoolo cadeynta leedahay waxa inooga filan 3seddaxdan tusaale ee aan kusoo dheegannay diinteena suuban.

Tusaale 1aad:- "mar walba aad walaalkaaga u dhoolo cadeyso waa sadaqo"nabi muxamad (scw).

Tusaale 2aad:- cabdulaahi bin xarith (RC) wuxuu yiri

"Waligey ma arag qof ka dhoolo cadeyn badan nabi muxamad (scw).

Tusaale 3aad:- jaabir bin cabdulaahi wuxu yiri "tan iyo markaan soo islaamay nabigu (scw) kama daalin inuu dhoolo cadeeyo mar waliba oo i,arko.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Qof kasta oo muslim ahi waxa uu u baahan yahay inuu horumariyo dabeecadda dhoolo cadeynta. Waa dareen farxadeed oo ka aloosma kan dhoollo cadeynaya iyo kan loo bandhigaya labadaba. Dhoollo cadeyntu waxay hoos udhigtaa in jirkeennu soo daayo dhecaanada dardar welwelka, walaaca, iyo welbahaarka. Waxa naftu daayo culeyska qalbiguna waxa uu dareemaa degenaan iyo naxriis.

Faa,idooyin badan ayey leedahay dhoollo cadeynta in aad qabatinto dabciga dhoollo cadeynta iyo muusoodka:-

1.waa sunne ay tahay inaan kaga dayo nabigeenna muxamad (scw) waana sadaqo iyo ajar aad ka heleyso liibaan adduun iyo mid aakhiraba.

2.Waxay sare u qaadaa wax soosaarka shaqsiyadeed. farxad galinta shaqaalaha kale iyo firfircoonida jirkaagu kahelayo waxay fududeyneysaa in si hawlkarnimo loo qabto hawl maalmeedka.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

3.sida lagu ogaadey cilmi baarisyo dhowr ah.

Muusoodka iyo dhoollo cadeynta waxay yareysaa cuduro badan oo ka mid ah dhiig karka iyo macaanka. Yaraanshaha welwelka, isku buuqa iyo degenaashaha maskaxdeed ee aad ka heleyso ayaa ku siinaya kansho aad kaga baxsato cuduradaas.

4.waxay farxad galisaa bulshada, waa xeelad aad ku kasban karto quluubta bulshada kugu xeeran. Dhoollo cadeyntu waa hubka khatarsan ee aad ku ugaarsan karto qalbiyada dadka kale.

5. Ugu danbeyntii, inaad tahay qof marwalba dhoollo cadeeya waxay kuu sahleysaa inaad noqoto mid faraxsan, dadka jecel yahay, firfircoon, taasi oo kuu sahleysa inaad kobciso hanaankaaga hogaamineed.

Gunaanadkii: dhoollo cadehynta waa sunne. Ku dayo suubaneheenna muxamad (scw) oo noqo qof mar walba dhoolo cadeeya. Shaqeyso ajar adiga oo dhoollo cadeynaya maadaama nabi muxamad (scw) uu inoo sheegey inay tahay sunne.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Aamusnaanta

Waa maxay aamusnaanta

Aamusnaanta waa dahab sababtoo ah waxay kaa celinaysaa dunuubyo badan aad gali lahayd, waxay ka hor tageysaa dhibaato badan aad noloshaada ugeysan lahayd, waayo hadii aad hadal badan tahay ugu horeen dadka ayaa kugu nacaya, waxaadna noqoneysaa qof aan ixtiraam lahayn, balse hadii aad aamusnaanta badisid waxaa ka badbaadeysaa waxyaabo badan aan noloshaada u wanaagsaneyn.

Todobo xaaladood oo aamusnaanta runtii dahab tahay, maxay yihiin?

1.marka aad weydo dood lagu qanci karo:

Waa in aad iska aamustaa, waayo:

Marka laguu soo bandhigo dood ama dood u baahan inaad qiil u raadiso oo aadan haysan dood lagu qanci karo, aamusnaanta ayaa si toos ah u soo afjaraeysa dood kasta aadan rabin.

2.marka la dareemo xishood:

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Waa in la iska aamusaa, waayo:

Marka aynaan helin wax muhiim ah ee aan is niraahno, waxa laga yaabaa inaan si nacasnimo ah u hadalno, isla marka hadalka dhameynana, waxa aynu dareemnaa jahawareer oo aynu bilowno inaan madaxa iska xoqno ama aragno, halka ay ku habboon tahay inaan aamusno doorrano.

3.marka uu hadalka ku qusayn:

Waa in aad iska aamustaa, waayo:

Inta badan waxa laguu soo bandhigaa sheeko aanay adiga ku qusayn ay fiincan tahay inaadan la hadlin si ay udhex galin, ama ugu yaraan ugu sugto qof ku weydiinaya fikirkaaga.

4.markaad xanaaqdo:

Waa in aad iska aamustaa, waayo:

In lagu jiro dooda adag, oo xamaasad leh, waa wax caadi ah inaad tiraahdo waxa ka naxay dareenka qofka kale, run ahaantii waxaan hore u ognahay in aanu diyaar unahay in aanu niraahno ay dhaawacayaan qofka ay khusayso, laakiin waxaan

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

dooraney inaan dhahno si kastaba ha ahaatee.

5.marka hadalku dhamaado:

Waa in aad iska aamustaa, waayo:

Tani waxa ay khusaysaa oraahda ah hadii hadalka qalin yahay, ka dibna aamuso, xitaa hadii aad xaaladaha qaarqooda dareento in aamusnaanta ay tahay wax laga xishooda, laakiin waxa ay aad ugu fiican tahay inaad sheegto, markaad wax ku sheegto.

6.markaad dareento xumaan:

Waa in aad iska aamustaa, waayo:

Waxa laga yaabaa inaad ku hadasho wax aad ka qoomameyso marka niyad xumadaada dhamaato, laakiin waxa laga yaabaa qofka kale inuu san ku cafin waxaad tiri.

7.marka uu qof kaa xanaajiyo:

Waa in aad iska aamustaa, waayo:

Jawaabta ugu fiican ee aad siinkarto qofka kaa xanaajinaya waa aamusnaanta, maadaama ay muujineyo ixtiraam la,aanta qofka, iska

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

indhotiriddana waa hub waxtar leh oo looga talagaley xadgudubka.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Sare uqaad iimaankaaga

10 tobon talaabo aad sare ugu qaadi kato, kuna xoojin karto iimaankaaga.

1.Towbada: bini,aadamka waxaa uu ku dhaca dambiyo iyo khaladaad, sababtoo ah ma nihin kuwa dhameystiran. Hadaba waa in aad mar kasta alle dambi dhaaf weydiisataa, si dhab ahna ugu towbad keentaa, kana fogaataa inaad dambi sameyso.

2. Salaada: Tuko shanta salaadood si joogto ah. Ilaali wakhtiga salaadaha. Baro axkaamta salaadaha.

3. Qur,aanka: Akhri Qur,aanka, baro micnihiisa, faham xikmadaha uu illaahay (sw) inoogu sheegey, fuli wax kasta oo alle inafarayo ee qur,aanka ku xusan, hubi in 24saac aysan ku dhaafin adigoon kutubka kala furan oo qur,aanka aqrin.

4. Xuska alle: bar carabkaaga dikriga alle oo ku celceli mar kasta kalmadahaan: subxaan Allaah, Alxamdulilaah, Allaahu akbar, laa,illaah illa allaah, laa xawla walaa quwata illaa billaah-hil caliyul cadiym.

5. Alle oo la talo saarto: Eebe waa naxriis badane,

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

sidaa darteed waa in aad talo saarataa mar kasta, naxriistiisa aadan ka quusan, mar kastana aad kheyr ka rajeysaa.

6. Ducada: Alle (sw) oo aad barido waa mid ka mid ah siyaabaha loo xoojiya iimaanka, alle waa ka jawaabaa duco kasta oo adoomadiisa ka timaada.

7. Cilmiga diinta oo la barto: Guud ahaan cilmiga waa nuur, waa fure, diinta islaamka oo aad barataa, Qur,aanka kariimka, siirada nabiga iyo kutubo kale waxay qofka ka saartaa jahliga, waxay xoojiyaan qalbigiisa, waxayna ku hoggaamiyaan in uu kala fahmo xaqa iyo baadilka, iyo in la qaldi karin, oo wadada alle laga leexin karin.

8. Soonka sunada ah: fadli badan ayaa sugan soonka sunada ah, qofkii awooda in uu soomo maalmaha isniinta iyo khamiista wuxuu helayaa faa,idooyin badan. Rasuulka (sw) waxa la weydiiyey soonka maalinta isniinta wuxuu yiri "waa maalinta aan dhashay, waxyigana la igu soo dajiyey. Rasuulka (sw) waxa uu ahaa mid sooma maalinta isniinta iyo

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

khamiista.

9. Xasuusta dhimashada iyo aakhirada: hadii uu qofka xasuusto dhimashada iyo aakhirada waxa uu ogaanaya macnaha dhabta ah oo adduunka loo joogo, wuxuuna ku dadaalayaa raali ahaanshaha illaahay iyo in uu shaqeysto daarta dambe ee lagu waarayo.

10. Camal wanaagsan: ku dadaal inaad joogteyso sameynta camalo iyo ficilo wanaagsan, ilaa ay dabeecad kaaga noqdaan. Hal camal oo wanaagsan waxa uu kugu hoggaamiyaa mid kale oo wanaagasan. Markasta ku dadaal sidii aad ku sameyn lahayd ficilo wanaagsan.

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504

Iftiimi noloshaada

Dhamaad

Halkaas ayuu ku dhamaadey maqaalkii **xasan nuur aadan. {Dhaqtarka ___Qalbiga}.** Taariikhdii aan dhameeyey kitaabka waa **10/4/2023.** Mida hijriyadana ay tahay **19/9/1444.** Qof waliba oo jecel inuu noloshiisa iftiimiyo waxaan u rajeyneyaa guul. Dhamaanteyna illaahay nolosheyna haka dhigo mid iftiimaysa, **aamiin, aamiin, aamiin.....**

 wixii talo iyo tusaale ah waxaad igala xiriiri kartaa Tell:0684492190/wats app/telegram/ massenger, etc. Aadan shaacir xasan nuur //http//www@Email@. Tell:0613212504